




3 Diseembar 2021



Is tallaalka ku lidka ah COVID-19

Xaqqiyooyinka ku saabsan tallaalada:

- Tallaalka waxaa loo ansixiyaa qof kasta oo ah da'da 5 ama ka wayn – iyo sidoo kale haweenka uurka leh iyo kuwa naas nuujinaya.
- Waa muhiim in la tallaalo xataa haddii aad hore u qabtay cudurka. Tani waxay ku siin doontaa soo saarida ugu wanaagsan.
- Waxaa jira labba tallaal oo kala duwan: Mid laga soo qaaday Moderna iyo mid Pfizer BioNTech. Si siman waxay u yihiin kuwa wanaagsan, badbaado iyo waxtar leh.
- Waxaad u baahan tahay in labba jeer lagu tallaalo. Tani waxay ku siin doontaa soo saarida ugu wanagasna.

Is tallaal ballan la'aan

Way fududahay in lagu tallaalo. Waxaad iman kartaa dhammaan xarumaha tallaalka addoon qabsan ballan marka koowaad.

Masuuliyiinta caafimaadka Dheenisku waxay ku talinayaan in lagu tallaalo sababtoo ah

- tallaalku waxa uu kaa ilaaliytaa inaad si daran uga jiranaato COVID-19.
- waxaad ka ilaalisaa qoyskaaga, saaxiibadaa iyo kuwa kale inaad qaado.
- tallaalku muhiim ayuu inoo yahay si aynu u xakamayno safmarka.



Badbaado ma tahay in lagu tallaalo?

Dhammaan tallaalku waxay sababaan saamayn xun, ay ka mid tahay tallaalka COVID-19. Ugu badnaan waxay noqon doonaa saamayn xun oo degen oo u qarsooma si degdeg ah. Kuwan waxay noqon karaan qandho ama xanuunka goobta mudditaanka.

La xidhiidh dhakhtar haddii aad isku aragto calaamado daran kadib marka lagu tallaalo. Tani waxay noqon kartaa dhibaatooyinka neefsashada ama finanka ka soo yaaca maqaarka. Si kastaba ha ahaatee, tani dhif ahan ayay dhacdaa.

Sida tallaalkaagu u dhaco



Kaalay xarunta tallaalka. Xusuuso inaad soo qaadato kaadhkaaga caymiska caafimaadka ee jallaha ah.



Waa dhakhtarka qofka ka masuulka ah tallaalkaaga.



Dadka badankooda waxaa laga tallaalaa gacanta sare.



Ka dib tallaalkaaga, waxaad u baahan tahay inaad ku sugto 15 daqiiqo xaga goobta, markaad waxaad heli kartaa caawimada haddii aad qabto falcelinta

Su'aalaha?

Had iyo jeer waxaad ka heli kartaa macluumaadkii u dambeeyay ee ku saabsan tallaalka ku lidka ah COVID-19 websaydkayaga. Wax badan ka eeg bogga www.sst.dk/covid-vaccination. Waxad sidoo kale naga raaci kartaa Facebook, halkaas oo aanu kula socod siin doono wax ku saabsan koronofayraska iyo tallaalada.

